

## U Diyaargarawga Guriga

### Wax badan kaga ogow xogsidayaasha la xiriira:

- Biyaha Xaaladaha Gurmada
- Saadka Xaaladda Gurmada
- U Diyaarsanida Masiibada ee Shakhsiyaadka iyo Qoysaska

Macluumaad dheeraad ah, booqo [Take5toSurvive.com](https://www.Take5toSurvive.com)

### Ammaanka Dhulgariirka Guriga ee FEMA:

<https://bit.ly/1aQLpR2>

### Sawirrada Raadsiga Halista Guriga ee FEMA:

<https://bit.ly/2rAnRrQ>

### Fiidyawiyada Sahlidda Dhulgariirka Guriga ee Gobolka Illinois:

<https://bit.ly/2No79L2>

### Khayraadka Kahortagga Dabka Guriga ee Gobolka Oregon:

<https://bit.ly/33NPO3Q>

### Waa maxay sababta aad gurigaaga ugu diyaarinaysaa?


Istaatistigis ayaa muujiyey in dababka, shilalka, iyo dhaawacyada intooda badan ay ka dhacaan guriga. Farnijarka, qalabka korontada ku shaqeeya iyo xiitaa alaabada yaryar ee kale waxay noqon karaan halis xilliga dhulgariirka. Hadda waxaad qaadi kartaa tallaabooyin kahor masiibada si aad gurigaaga uga dhigto mid badbaadada.



### Hubinta ammaanka guriga

Gurigaagu wuxuu noqon karaa mid khatar badan kadib masiibada. Isticmaal liiskan hubinta si aad u ogaato haddii gurigaagu yahay mid ammaan ah:

- Farnijarka waawayn iyo qalabka korontada ku shaqeeya ayaa lagu xirayaa gidaarka.



#### Secure large pieces of furniture


- Walxaha gidaarka saaran waxa lagu qabanayaa jillaabyo halkii masaabiirta.
- Meelaha la seexo waxa laga qaadayaa

wixii shay ah ee kugu soo dhici kara inta aad huruddo.

- Kiimikooyinka waxa loo kaydinayaa si ammaan ah oo dhulka u dhaw si ayna u soo dhicin oo ayna u quban.

- Shayada culus waxa la dhigayaa khaanadaha ugu hooseeya.
- Dhirta iyo geedaha waa la jarayaa si ayna dhismaha u taaban.
- Kulayliyaha biyaha kulul waxa lagu qabanayaa gidaarka.
- Qalabka naqaska ku shaqeeyaa wuxuu leeyahay xiriirka dabacsan.

### U isticmaal qabatooyin si aad u soo laalaadiso



### Uurso saadka xaaladda gurmada

Marka halisaha la ogaado, waxaad si sahlan oo dhakhso ah uga dhigi kartaa gurigaaga meel ammaan ah oo lagu noolaado. Hadda maadaama aad wax ka qabatay haliso iman karayay, waxaad soo dhigan kartaa gurigaaga qalabka xaaladaha gurmada ee

muhiimka ah qaarkood sida:

- Qalabka dabka lagu damiyo—ugu yaraan mid madbakha dhig, laakiin sida fiican mid dhig albaab kasta oo laga baxo oo gurigu leeyahay sidoo kale

## Gather emergency supplies, continued

- Qaylodhaamaha qiica iyo kaarboon mono-ogsaaydhka oo leh beetariyo dheeraad ah
- Sallaan loogu talagalay ka qixista guriga dabaqyada badan ah
- Saadka xaaladda gurmada: akhri xogsidaha Saadka Xaaladda Gurmada iyo Kaltirsiga U Diyaarsanida

## Ku Diyaargarowga Dibadda Gurigaaga

- Meelaha baadiyaha ah, ku ilaali dhirta iyo doogga cagaar oo jar dhammaan dhirta qallashay in 30 fuudh guriga u jirta.
- ka xaadh qodxaha, caleemaha iyo qashinka kale ee pine-ka majaroorka iyo saqafka. Waxay shidaal u noqon karaan dabka.
- Gee girgirayaasha wax lagu solo iyo godadka dabka ee dibadda ugu yaraan meel 10 fuudh u jirta guriga iyo wixii dhir ah
- Hubi in lambarka gurigaaga jidka laga soo akhriyo marka mugdiga.

## Dhis Xirfadahaaga


- Baro sida loo xiro korontada iyo biyaha iwm.
- Baro sida loo isticmaalo qalabka dabka lagu damiyo
- Haddii aad leedahay sallaanka baxsiga baro sida loogu isticmaalo si ammaan ah.

## Dabbaq

Hadda waxaad u diyaarisay gurigaaga masiibo, waxa haddaba muhiim ah inaad dabbaqdaan ka jawaabista xaaladaha gurmada ah adiga iyo qoyskaagu.

- Tijaabi qaylodhaamaha qiica iyo kaarboon mono-ogsaaydhka bil kasta.
- Qabo carbis dhulgariir oo qoyska ah. Dabbaqa Istuur, Hoosgal oo Qabso.
- Sameeya carbsiyo dabka oo qoyska ah si aad u dabbaqdaan ka qixista guriga.
  - Raadi laba qaab oo looga baxsado.
  - Isla meel dhiga laba meelood oo aad ku kulantaan qoyskaaga. Meeli ha noqoto meel la wada yaqaan oo bannaanka gurigaaga ah, sida sanduuqa waraaqaha, meesha kalena ha noqoto meel ku taala meesha aad deggan tahay, sida guriga saaxiib, dugsiga, ama goob macbad ah.
- Isticmaal sallaankaaga baxsiga.
  - OGOW: shirkadaha soosaara sallaamada qaarkood waxay dhahaan in sallaanku uu ku fiican yahay kaliya hal isticmaal, markaa kaliya dabbaqa diyaarinta sallaanka—waa inaanu qofna ka soo degin.
- Aqoonso meelaha ay ku yaalaan halka laga damiyo adeegyada: naqaska, biyaha iyo korontada.

- Dib u eeg sida loo damiyo nooc kasta oo adeeg ah. Hoos ka fiiri sawirro muujinaya sida loo damiyo adeegyada.



- Xasuusnow: Ka xir naqashka halka cabbirka haddii aad ka shakido inay baxayso. Kaliya qof xirfadle ah ayaa naqaska dib u furi kara